Deutsches Rotes Kreuz

SUCHDIENST

Baafinta caalamiga ah ee qaraabada

Macluumaadka ku saabsan dhawrista xogta

Raadinta. Wada xiriirinta. Isku keenidda.
Adeegga Raadinta ururka Laanqayrta Cas ee Jarmalka (Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka) waxuu taageeraa dadka ay kala lumeen qoyskooda ama qaraabadooda sababtoo ah colaadaha dagaal, masiibooyinka dabiiciga ah, baxsashada, barakaca ama haajiraadda. Waxuu caawiyaa raadinta xubnaha qaraabada, si iyaga dib loogu wada xiriiriyo oo qoysaska la iskugu keeno.

Waa maxay xogta aan shaqadayada ugu baahan nahay?
Si aan qof u raadinno, Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka waxuu u baahan yahay in uu helo macluumaadka ugu farabadan ee suurogal ah ee qofkan ku saabsan. Waxaa tan ka mid ah macluumaadka sida magaca, taariikhda dhalashada, faahfaahinta halka uu ka soo jeedo iyo dariiqa uu baxsashada u maray. Duruufta ama xaaladda keentay in ay qoyska kala kulmaan ayaa iyaduna muhiim u ah baaristayada. Maxaa dheer, Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka waxuu u baahan yahay macluumaadka xiriirka qofka baaraya ama raadinaya waxuuna rabaa in uu ogaado waxa ay qofkan isku yihiin qofka la raadinayo. Waxaa baarista weliba caawin karta in sawir laga helo qofka raadinaya.

Xogtan dhammaanteed (xataa sawirrada) ayaa ah xog shakhsi ahaaneed oo aan u baahan nahay si ay noogu suurtogasho in aan ka shaqayno danta qofka raadinaya iyo qofka la raadinayo.

Waa maxay ujeeddooyinka aan xogta ugu shaqayno?
Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka waxuu xogta shakhsi ahaaneed u isticmaalaa si uu:

1. u raadiyo dadka la baafinayo
2. u caddeeyo ajalka ku yimid oo
3. uu isku keeno qoysaska.

Miyaa xogta dad kale loo gudbin doonaa?
Waxaan xogta shakhsi ahaaneed ku haynaa sir adag. Marka qof la raadinayo, waxaan codsiga raadinta u kala dhex gudbinnaa Shabakadda Dib u soo celinta Xiriirrada Qoyska (Shabakadda Dib u soo celinta Xiriirrada Qoyska - isutagga Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka iyo Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas (ICRC) iyo Ururrada Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas ee waddamada kale). Waddamada lagu tuhunsan yahay in uu joogo qofka la raadinayo gudahood, Adeegga Raadinta ee u dhow ayaa isku daya in uu macluumaad dheeraad ah ka helo halka uu ku sugan yahay qofka la raadinayo. Iyadoo shaqadan muhiim u ah waxaa loo baahan karaa in xogta shakhsi ahaaneed loo gudbiyo dad kale, matalan

- hay'adaha dawladda (matalan masuuliyiinta haajiraadda, masuuliyiinta diiwaangelinta, xabsiyada),
- ururrada caalamiga ah,
- degganeyaasha magaalada yar iyo tuulada ama odayaasha qabiileed.

Waxaa weliba laga yaabaa in xogta shakhsi ahaaneed la daabaco ama la baahiyo si raadinta loogu sameeyo (matalan sawir ka baarista internetka barta www.tracetheface.org, barnaamijyada raadiyaha ee wadajir u ah guddiga ICRC iyo BBC / Soomaaliya, liisaska oo lagu daabaco goobaha shacabka u furan ama Internetka).

Deutsches Rotes Kreuz

SUCHDIENST

Waxaa xogta loo gudbin doonaa oo keliya hay'adaha ama ururrada kale haddii tan loo baahan yahay si loo fuliyo hawlaha adeegga raadinta. Wixii khuseeya qaabka lagu fuliyo caddaynta oggolaanshaha ee lagama maarmaanka ah, waxaad iska reebi kartaa waddamada qaarkood, ururro kale ama xataa daabacaadda ama baahinta hawlaha aan raadinta ku wadno.

Muddo intee leeg ayaan xogta kaydinnaa?
Xogta aad annaga nagu aaminto waxaa la kaydin doonaa inta loo baahan yahay si loo fuliyo ujeeddooyinka kor ku xusan ee xogta loogu shaqeeyo.

Waa maxay xeerasha qabanaya ka shaqaynta xogta?
Qof kaste oo laga hadlayo waxuu xaq u leeyahay dhawrista xogta. Shaqada Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka waxaa lagu maamulaa qodobbada ku jira Sharciga Dhawrista Xogta ee Adeegga Raadinta Jarmalka (SDDSG). Maxaa dheer, waxaa annaga na qabanaya qodobbada ku jira Shuruucda Dhawrista Xogta ee Guud (DS-GVO) iyo Sharciga Dhawrista Xogta Federaalka Jarmalka (BDSG) marka aan xogta shakhsi ahaaneed ka shaqaynayno. Haddii aan shaqadayada ugu baahanno in aan xogtaada ka dhex fidinno Shabakadda Dib u soo celinta Xiriirrada Qoyska, hay'adaha ama ururrada taas ku lug leh waxay raaci doonaan Xeerka Habdhaqanka ama xirfadeed ee caadiga ah ee u yaalla Dhawrista Xogta Waxaan annagu rabnaa in aan hubinno in xogtaada si hagaagsan loo dhawro, ayna ugu yaraan taas sameeyaan rafiiqyada shabakadda nagula jira, haddii ay joogaan halkan ama dalka dibaddiisa.

Waa maxay xuquuqda adiga kaaga taalla dhawrista xogtaada shakhsi ahaaneed?
Waxaad xaq u leedahay in aad macluumaad bilaash ah ka hesho xogta shakhsi ahaaneed ee aan annagu kaa hayno. Maxaa dheer, waxaad xaq u leedahay in la saxo xogta qaladka ah ee aan annagu kaa hayno. Haddii waqti ka dib aadan oggolayn kaydinta xogtaada shakhsi ahaaneed, taas waad noo soo sheegi kartaa. Waxaan markaa annagu qaban qaabin doonnaa in xogtaada la tirtiro ama la xayiro.
Caddaynta oggolaanshaha ee la siiyey Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka waqti kaste ayaa si buuxda ama qayb ahaan loo burin karaa. Fadlan ogsoonow in daabacaadyada mustaqbalka oo keliya laga burin karo oggolaanshaha laga bixiyey in sawirka qofka raadinaya lagu daabaco sawirrada derbiyeed, buugaagta sawirrada ama liisaska caalamiga ah, laakiin aanan laga burin karin ama laga celin karin nuqullada hore loo soo saaray. Burinta waxaa qoraal loogu caddayn karaa Xafiiska Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka uu Munich ku leeyahay, Chiemgaustraße 109, 81549 Munich, iimaylka: tracing@drk-suchdienst.de (ama waxaa loo diri karaa hay'adda ama ururka masuul ka ah) iyadoo magaca la sheego.

Yaad adigu la xiriiri kartaa (ururka masuul ka ah)?
Haddii aad su'aalo ka qabto ku shaqaynta xogtaada ama hirgelinta xuquuqda aad u leedahay macluumaadka, saxidda, tirtiridda, xayiraadda ama burinta, waxaad la xiriiri kartaa xarunta Adeegga Raadinta ee Laanqayrta Cas ee Jarmalka ee aad kala xiriirtay weydiintaada raadinta ku saabsanayd.

Shaambadda ama magaca, cinwaanka iyo lambarka telefoonka xarunta taageerada

Deutsches Rotes Kreuz

SUCHDIENST

Haddii aadan ogayn cidda aad la xiriiri karto, waxaa kuu furan in aad la xiriirto xarunta dhexe ee Adeegga Raadinta ee Laanqayrta
Cas ee Jarmalka
:

Deutsches Rotes Kreuz
-Generalsekretariat-
Team 22/Suchdienst-Leitstelle
Carstennstraße 58
12205 Berlin
Telefoon: 030 / 8 54 04 -170
Fakis: 030 / 8 54 04 -458
Iimayl: suchdienst@drk.de

Sarkaalkayaga dhawrista xogta ee Adeegga Raadinta, Marwo Frauke Weber, ayaa iyadana iimayl loogu diri karaa halkan: frauke.weber@drk.de.